

# Goobyaa Nadiifinta Boathouse Inc Renton Skyway



Goobyaa Nadiifinta Boathouse Inc Renton Skyway

## Waa la aqbalay Faallooyinka

Luulyo 18 – Agoosto 16, 2022

### Ku dir faallooyonka

#### Barta oonleena:

<https://bit.ly/Ecology-Boathouse-Comments>

#### Ama limaylka:

Sandra Matthews, Site Manager  
WA Department of Ecology  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133-9716  
425-223-1999  
[sandra.matthews@ecy.wa.gov](mailto:sandra.matthews@ecy.wa.gov)

## Goobaha dib u eegista dukumiintiga

<https://bit.ly/Ecology-Boathouse>

#### Skyway Library

12601 76<sup>th</sup> Ave S  
Seattle, WA 98178  
206-772-5541

#### Department of Ecology Northwest Regional Office

15700 Dayton Ave N  
Shoreline, WA 98133

Fadlan wac si aad u qabsato balan:  
206-594-0000

## Xogta Goobta

Facility Site ID: 56652786  
Site Cleanup ID: 567

## Nidaamka nadiifintu wuxuu sameynayaa hormar

Waxda Cilmiga Deegaanka (Department of Ecology) (Cilmiga Deegaanka) waxay kormeer ku sameynaysaa nadiifinta lagu sameynaayo Goobta Boathouse Inc Renton Skyway ee kutaala xaafada Skyway, oo ayna sameynayso GardnerGlobal, Inc (GG). Waxda Cilmiga Deegaanka ayaa bixinaysa kharashka ku baxaaya nadiifinta ayagoo u maraaya Barnaamijkooda Deeqda ee lagu Nadiifiyo Guryaha Qiimahooda Jaban yahay (Affordable Housing Cleanup Grant Program). Barnaamijkaan wuxuu hubiyaa in goobaha "si sax ah loo nadiifiyey ayadoo kor loo qaadayo ka qaybgalka bulshada iyo hubinta nidaamka guryaha qiimahooda la awoodi karo."

Waxaan jeclaan lahayn inaan helno faalladaada ku saabsan dukumiintiyadaan soo socda:

- **Wareegtada Oggolaanshaha la xariirta Iibsadaha Mustaqbalka (Prospective Purchaser Consent Decree, PPCD):** Waa heshiish sharci ah oo u oggolaanaya iibsadaha inuu nadiifiyo goobta, uuna helo masuuliyada goobta.
- **Qorshaha Ka qaybgalka Dadwaynaha (Public Participation Plan):** waa dukumiinti sharaxaaya sida dadku oga qaybgeli karaan nidaamka nadiifinta.

## Kulanka dadwaynaha ee oonleena ah

Tixgelinta badqabka iyo caafimaadka dadwaynaha, Waxda Cilmiga Deegaanka waxay qaban doontaa kulan dadwayne oo oonleena ah si dadku u helaan xog badan loogana jawaabo su'aalooda.

### Waxaa qasab ah in la isdiwaan geliyo.

**Talaadada, Agoosto 3, 2022**

6:30 – 7:00 p.m. bandhiga

7:00 – 7:30 p.m. kulan su'aalo iyo jawaabo ah

Booqo <https://bit.ly/Ecology-Boathouse> si aad u hesho ku saabsan sida loo galo barta lana isku diiwaangeliyo.

## Taariikhda Aasaasiga ah

Xarunta Boathouse Inc. Renton Skyway (xarunta) waxay horey u ahaan jirtay bakhaar gada tafaariiqda iyo goob sameysa adeegyada nadiifinta qalalan waxayna ku taali jirtay Skyway, oo ah xaafad aan ka tirsaneyn maamulka King County, Washington. Hantidu waxay ku fadhidaa qiyaas ahaan dhul le'eg 0.48 acres waxayna ku taalaa aag ganacsi oo kamid ah xaafada.

Goobta adeegyada nadiifinta qalalan, Ken's Skyway Cleaners, waxay goobta ku shaqeynaysay laga bilaabo 1982 illaa 2002. Kiimikooyinka khatarta ah ee loo adeegsado ganacsiga nadiifinta qalalan ayaa wasakheeyey ciidda iyo biyaha dhulka hoostiisa kujira.

GG wuxuu kujiraa heshiiska iibinta iyo iska iibinta si dib loogu hagaajiyo Goobtaan loogana dhigo mashruuca Skyway Towncenter

(Mashruuca) mashruucan adeegyada kaladuwan, guriyeynta qoysaska badan ayaa yeelan doona arrimahaan soo socda:

- Qiyaas ahaan qaybo guud ahaan ku fadhiya dhul dhan 250
- Goob ugu yaraan leh 50 guryo oo ah guryaha qiimaha jaban (20% oo ah guud ahaan guryaha)
- 30,000 oo ah cabir laba jibaaran looguna talagalay ganacsi, xaafiis, iyo goob bulshadu ku kulmaan

Guryaha qiimaha jaban waxaa lagu heli karaa kiro waxaana kireysan kara 60%-80% dadka hela dakhliga dhexdhexaadka ah ee deegaanka (area median income, AMI). Dakhliga Dhexdhexaadka ah ee Deegaanka (area median income, AMI) waxaa sanad walba mar xisaabiya Waaxda Guriyeynta iyo Hormarka Magaalada (Department of Housing and Urban Development) ee Gobal walba. Naqshada loo dhisanaayo goobtaan ayaa la dooran doonaa ayadoo la adeegsanaayo rayiga bulshada iyo shaqada farshaxaniistayaasha deegaanka. Haddii aad qabto su'aalo ama faallooyin ku saabsan dib u dhiska lagu sameynaayo hantidaan, fadlan halkaan faalo ku dhaaf

<https://bit.ly/SkywayTowncenter>

## Wasakhda

**Wasakhda saameynta ku yeelatay Biyaha dhulka ka hooseeya ayaa la xaqiijiyay inay ka jirto goobta iyo aagaga ku dhaw si loo nadiifiyo goobta. Inta ay le'eg tahay wasakhdu waxaa lagu oggaan doonaa baaritaanka sixida xogta. Ceelasha biyaha ee ka jira degmada Skyway Water District (oo ay isticmaalaan qiyaas ahaan 9,890 isticmaale) iyo City of Renton (oo ay qiyaas ahaan isticmaalaan 62,100 isticmaale) waxay ku yaalaan meel 2 mayl u jirta goobta.**

Baaritaanada waxaa lagu oggaadan wasakhdaan ciidda iyo biyaha dhulka ee soo socda:

- Kiimikada Biyaha (Tetrachloroethene, PCE)
- Kiimikada trichloroethene (TCE)
- Kiimikada cis-1,2-dichloroethene (DCE)
- Kiimikada vinyl chloride (VC)

Dhammaan waxyaabahaan wasakhda keenaya waxaa laga helay heerar ka sareeya sharciga nadiifinta gobolka, Xeerka Xakameynta Nidaamka Sunta (Model Toxics Control Act, (MTCA<sup>1</sup>)). Xeerka Xakameynta Nidaamka Sunta (Model Toxics Control Act, MTCA) wuxuu dhigayaa in wasakhdaan la nadiifiyo.



Muuqaalka hawada laga qaaday ee goobta, maanta.

<sup>1</sup> [www.ecology.wa.gov/mtca](http://www.ecology.wa.gov/mtca)

## Maxay tahay sababta goobtaan muhiimka u tahay

Nadiifinta goobtaan waxaa suurtagaliyay ururka asagoo maalgelin ka helaaya Deeqda Nadiifinta [Guryaha Qiimaha Jaban ee Waaxda Cilmiga Deegaanka](#)<sup>2</sup>.

Washington waxay si saa'id ah ugu baahan tahay guryaha qiimaha jaban guud ahaan gobalka oo dhan. Wasakhda, ama xataa marka laga shakiyo inay jirto wasakh, waxay kor u qaadaan qiimaha hormarka guryaha. Qiimaha saa'idka ah wuxuu shirkadaha guryaha dhisa ku keenaa inay helaan kaalmo yar si ay u dhisaan guryaha la awoodi karo.


Marka laga imaado khataraha la xariira dib u habbeynta, nadiifinta goobaha wasakhoobay waxay noqon kartaa hawlo adag oo leh khataro ay tahay in la tixgeliyo. Qiimaha iyo waqtiga ku baxaaya nadiifinta goobta badanaa fahan wayn lagama haysto; arrintaas oowgeedna, goobo badan ayaa la iskaga tabaa ayagoo maran ama aan la isticmaalin muddo sano ah, xataa marar muddo qarniyo ah. Taageerida nadiifinta lagu sameynaayo guryaha qiimaha jaban waxay gacan ka geysanaysaa hubinta in la sameeyo nadiifinta, iyo in la ilaaliyo caafimaadka bulshada iyo kan bii'ada.

Waaxda Cilmiga Deegaanka waxay sameysay Barnaamijka Deeqda Nadiifinta Guryaha Qiimaha Jaban (Affordable Housing Cleanup Grant Program, AHCGP) si uu gacan oga geysto kor u qaadista nadiifinta deegaanka gaar ahaan hormarka lagu sameynaayo guryaha qiimaha jaban. Deeqahaan waxay dabooli karaan kharashaadka hawsha, oo ay kujiraan sameynta qorshe, baaris, iyo shaqada farsamada ee loo baahan yahay si loo nadiifiyo goobaha wasakhaysan. Ujeedada Barnaamijka Deeqda Nadiifinta Guryaha Qiimaha Jaban (Affordable Housing Cleanup Grant Program, AHCGP) waa in la dedejiyo nadiifinta dibna loo habbeeyo goobaha wasakheysan si loo isticmaalo guryaha qiimaha jaban loona yareeyo saameynta kharashaadka nadiifinta.

## Maxaa xigga oo dhacaaya?

Waaxda Cilmiga Deegaanka waxay tixgelin doontaa dhammaan faallooyinka ay hesho waxaana laga yaabaa inay wax ka badesho dukumiintiyada ayadoo ku saleynaysa faalladiina. Intaas kadib, Wareegtada Oggolaanshaha la xariirta liibsadaha Mustaqbalka (Prospective Purchaser Consent Decree, PPCD) iyo Qorshaha Ka qaybgalka Dadwaynaha ayaa lasoo gabagabeyn doonaa, waxaana bilaabanaaya nadiifinta rasmiga ah. Baaritaan xog aruurin iyo Daraasad Wax ku ool ah ayaa la sameyn doonaa markaas kadib. Natiijada Baaritaanka xog aruurin iyo Daraasada Wax ku oolka ah ayaa lagu saleyn doonaa Qorshaha Hawsha Nadiifinta. Natiijada qorshaha hordhaca ah ee Baaritaanka xog aruurin iyo Daraasada Wax ku oolka ah iyo sidoo kale Qorshaha Hawsha Nadiifinta waxaa loo soo bandhigi doonaa dadwaynaha si ay ugu sameeyaan dib u eegis iyo faallo. (Fiiri garaafka hoose.)

## Nidaamka nadiifinta rasmiga ah ee Washington



<sup>2</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Brownfields/Affordable-housing>

Toxics Cleanup Program  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133

## Waxaa lasoo dhaweynayaan faallooyinka dadka - **Goobta** **Nadiifinta ee Boathouse Inc Renton Skyway**



Muuqaalka hawada laga qaaday ee goobta, maanta.

### Muddada faalladu u furan tahay dadwaynaha

Luulyo 18 – Agoosto 16, 2022

<https://bit.ly/Ecology-Boathouse>

### Kulanka dadwaynaha ee oonleenka ah

Talaadada, Agoosto 3, 2022

- 6:30 – 7:00 pm: bandhiga
- 7:00 – 7:30 pm: kulan su'aalo iyo jawaabo ah
- <https://bit.ly/Ecology-Boathouse> si aad u hesho ku saabsan sida loo galo barta lana isku diiwaangeliyo.

Codsiyada Adeegyada: Si aad Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) oga codsato adeeg oo ay kujiraan inaad agabyada ku hesho qaab ay arki karaan dadka naafada ka ah araga, wac waaxda cilmiga deegaanka kana wac 206-594-0000 ama booqo <https://ecology.wa.gov/accessibility>. Dadka naafada ka ah araga waxay wici karraan Laanta Adeegga ee Washington Relay ayagoo wacaaya 711. Dadka Naafada ka ah hadalka waxay wici karaan TTY waxayna ka wici karaan 877-833-6341.